

Duwamish Community Action for Clean Air

Ma ka walwalsantahay nadaafada hawada bulshadeena?

Nooga caawi inan nadiifino hawada xafadeena iyo bulshadeena

Dadka degan Duwamish valley caafimaadkooda waxaa dhib u keenaayo wasakhda ay gawaarida iyo warshadaha sii daayaan. Marki loo fiiriyo xafadaha kale oo King County ka mid ah, caruurta Duwamish valley degan aad buu cudurka neefta ugu dhacaa. Cilmi baaris ay Duwamish River Clean Up Coalition/TAG soo saareen waxay cadeeysay in hawada bulshada South Park, Beacon Hill, iyo Georgetown (zip code 98108) in ay oogu wasakh badantahay magaalada Seattle oo dhan. Mashruucaan wuxuu ka shaqayn doonaa bulshada dhexdeeda si ay u baaraan khatarta ku dhici karto caafimaadkeena. Waxaan hadda dooneynaa inaan ogaanno halka ay ka yimaadaan wasakhda iyo si loo wanaajiyo caafimaadka dadka bulshadeena degan.



Wasakhda hawada sidee u dhaawici kartaa caafimaadkaaga?

Hawada oo wasakhowda waxay dhaawici kartaa cid kasta siiba sambabada iyo habdhiska neefsashada. Waxay keeni kartaa neefta oo ku qabato. Duwamish Valley dhexdiisa waxay laba laabtay tirada caruurta hospitaalka u galeen neefta marki loo fiiriya meelaha kale oo King County ka mid ah. Waxaa sidoo kale badan tirada dadka waa weyn oo hospital galeen neefta darteed. Hawada wasakheysan waxay siiba dhaawacdaa hooyoyinka uurka leh iyo caruurta. Saamaynta muddada dheer waxay keeni kartaa neefta, sambabada inay bukoodaan, cudurada wadnaha, iyo cancer.

Muxuu hiigsanayaa mashruucaan?

- In la ogaado halka ay wasakhda hawada badankood ka imanayaan
- In dadka bulshadeena dagan la fahamsiiyo wasakhda hawada
- In la yareeyo haleelidda wasakhda hawada bulshadeena
- In la yareeyo khatarta cudurka neefta bulshada dhexdeeda

Sidee baad noo caawini kartaa?

- ka qaybgal shirarka bulshada
- balan u qabso qiimaynta hawada gurigaaga

Waxaad qaadata tallaabooyinkan si aad hawada gurigaada dhexdiis u nadiifisid:

- kabaha siib intaadan guriga soo gelin
- marwaxada jikada shido markaad wax karinaysid
- meelaha bolol ama dheecaan leh saabuun ku dhaq oo qalaji
- wiig kasto guriga huufareey oo boorka ka nadiifi
- guriga hawo cusub ha soo gasho

Hadii aad qabto su'aalo ama hadaad dooneysid inaad balan u qabsatid qiimeynta hawada guriga na soo wac (425) 638-9548